



Tilmaamaha dhaqida ee HiBiScrub® 40 mg/ml jidhka oo dhan loogu dhaqaayo


Waxa muhiim ah in dhaqista dhamaan maqaarka oo dhan la wada gaadhsiiyo. Raac tilmaamaha wax dhaqista ee shaqaalaha daryeelka. Caawimo weydiiso haddii aanad meel kasta wada gaadheyn.



Jidhka oo dhan wada qoy iyadoo aad biyaha xidhaysa.




Qaado HiBiScrub oo ku meydh timaha. Iska ilali inay saabuuntu indhaha iyo dhagaha kaa gasho.




Ku qaado HiBiScrub gacanta ama burush qoyan, iyadoo aad jidhka oo dhan si taxadir leh ugu wada maydhaysa. Xagga sare ka soo bilow oo hoos u soo wad.

Si taxadir leh u maydh:


- A - sanka iyo afka agtiisa
- B - kilaan kilooyinka
- C - xundhurta
- D - xubnaha taranka iyo gumaarka



Ka wada maydh dhamaan saabuunta.



Ku soo celi qodobada 2–4. Waxa aad hadda sameysay waxa loo yaqaan laba qubeysi.



Isku qalaji tuwaal nadiif ah. Xagga sare ka soo bilow oo hoos u soo wad. Qaado dhar nadiif ah iyadoo aad sariirtana go'yaasha ka badalayso.



Maadada shaqeynaysa: Klorhexidin.

Nooca daawada: Dareere infegshanka maqaarka loogu talo galay 40 mg/ml (jaale khaffiif ah).

Waxay ka kooban tahay: Maadada shaqeynaysa; Klorhexidin digulonat 40 mg/ml. Maadooyinka kale: Poloxamer, kokamidopropylaminoxid, isopropylalkohol, d-glukonolakton, glycerol, makrogol-glycerolkokoat, biyo la nadifiifyey.

Habka daawadu u shaqeynayso: HiBiScrub waa dilaaga jeermiska maqaarka lagu nadiifyo, kaas oo micnahisu yahay inuu dilaayo ama Hakinaayo koritaanka noocyoo badan oo bakteeri-yada iyo fangaska iyadoo sidaas darteed uu ka qeyb qaadanaayo inuu ka hor taggo infegshanka nabarada.

Meelaha lagu isticmaalaayo: Waxa HiBiScrub lagu isticmaala si maqaarka loogu nadiifyo iyadoo sidaas darteed lagu kaabaayo sidii looga hor tagi lahaa infegshanka nabarada. Marka lagu celceliyo maydhitaanka ayaa la heli doonaa saameyn dheer.

Digniin: Waxa HiBiScrub kaliya loogu talo galay jidhka guudkiisa iyo isticmaalka maqaarka. Waa in la iska ilaalio inay saabuuntu indhaha iyo dhagaha kaa gasho – wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg warqada dhalada daawada ku taala.

Qiyaasta dowska: Timaha ku maydh qiyaas ahaan 10ml HiBiScrub

Jidhka intisa kale ku maydh qiyaas ahaan 15ml HiBiScrub, ka ilali inay kaa gasho indhaha iyo godka dhagaha. Iyadoo ay ku xidhan tahay baaxada jidhka iyo intay leegyihii timahu ayaa baahida saabuunta HiBiScrub kala duwanaan karaa dadka kala duwan. Waxaanu soo jeedinaynaa ugu yaraan isku celcelis 25 ml oo markasta oo timaha la maydhaayo iyo saabuun marinta jidhka ee xigta (50 ml markiiba, marka laba lagu maydhaayo).

Läs mer på www.molnlycke.se

Mölnlycke Health Care AB, Box 13080, 402 52 Göteborg Tel: 031-722 30 00. E-mail: info.se@molnlycke.com Namnet Mölnlycke Health Care och logotypen och HiBiScrub är registrerade globalt och tillhör något av företagen inom Mölnlycke Health Care-koncernen. Copyright (2016)

SOMALISKA

 **Mölnlycke®**